

# Ha ka maqnaan Kiridhityada Canshuurta La siiyo Qoyska leh Ilmo iyo Xubin Shaqaynaya!



Xitaa haddii aan lagaaga baahnayn inaad xerayso canshuur celinta dakhliga Minnesota, waxaad weli buixin kartaa si aad u dalbato dheefaha canshuurta Minnesota. Kiridhitka Canshuurta Caruurta iyo Kiridhitka caruurta waaweyn ee u qalma waxay cashuur dhaaf siyaan dadka dakhligoodu ka hooseeyo heer cayiman. Kiridhitba waa la soo celin karaa, taasoo la macno ah in laguu soo celin karo xitaa haddii canshuur aanan lagugu lahayn.

## Wa maxay Kiridhitka cashuurta ilmaha iyo xubin u shaqaynaya qoyska?

Kiridhityada cusub ee la isku daray waxay heli karaan dadka reer Minnesota ee buuxiya shurudaha dakhliga qaarkood. Kiridhitka waxay ka kooban tahay Kiridhitka Xubinka u shaqaynaya Qoyska, Kiridhitka Cashuurta Ilmaha iyo Kiridhitka Carruurta Waaweyn ee u Qalma.

Kiridhitka Xubinka u Shaqaynaya waxaa heli kara dadka reer Minnesota ee dakhli kasbaday sanadka dhexdiisa.. Kiridhitka ayaa la mid ah 4% dakhligaaga kasbaday ilaa \$350.

Kiridhitka Canshuurta Ilmaha ee cusub waxaa heli kara dadka reer Minnesota ee haysta caruur u qalma oo ka yar da'da 18. Markay xereeyaan a canshuur celinta Minnesota, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto \$1,750 cunuug kasta iyadoo aan xadidneyn tirada caruurta:

- \$1,750 marka uu jiro hal ilmo oo weyn oona u qalma
- \$3,500 marka ay jiraan laba ilmo oo weyn oona u qalmaan
- \$5,250 marka ay jiraan saddex ilmo oo weyn oona u qalmaan
- \$1,750 marka ay jiraan ilmo kasto oo dheeraad ah oo qalma

Kiridhitka cusub ee caruurta u qalma waxa ay heli karaan dadka reer Minnesota ee haysta ilmo ka weyn oo u qalma. Amaantu waa loo oggolaaday ilaa saddex caruur ah oo waaweyn oo u qalma.:

- \$925 marka uu jiro hal cunug oo weyn oo u qalma
- \$2,100 marka ay jiraan laba ilmo oo weyn oona u qalmaan
- \$2,500 marka ay jiraan saddex ilmo oo weyn oona u qalmaan

## **Example**

Aan dhahno Dakhligaagu waa \$25,000 waxaanad ku leedahay hal ilmo oo u qalma dugsiga dhexe iyo mid ka wayn oo u qalma jamacaad. Waxaad xaq u yeelan doonta ugu badnaan \$350 Kiridhitka xubinka u shaqaynaya, \$1,750 kiridhitka marka uu jiro hal ilmo oo weyn oona u qalma, iyo \$925 marka uu jiro hal cunug oo weyn oo u qalma. Marka la dhammeeyo Jadwalka M1CWFC, *Kiridhitka Ilmaha iyo Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska ee Minnesota*

## **Sideen ku ogaan karaa haddii aan leeyahay ilmo u qalma ama ilmo ka weyn oo u qalma?**

Dib u eeg tilmaamaha ku jira Jadwalka M1DQC, *Ku tiirsanaanta iyo caruurta u qalma*, si loo go'aamiyo u qalmitaankaaga caruurta ama caruurta waaweyn.

## **Ma jiraan xad dakhli?**

Dhamaan seddexda kiridhitkaha waxay bilaabaan inay meesha ka baxaan marka dakhligaagu ka sareeyo \$35,000 si wadajir ah u xaraynta xaaska ama in ka badan \$29,500 dhamaan faylalka kale. Wadarta kirikdhitka waxay ku xiran tahay dakhligaaga, heerka xaraynta, tirada caruurta u qalanta, iyo tirada caruurta waaweyn ee u qalma. Buuxi Jadwalka M1CWFC, *Minnesota Child and Working Family Credits*.

## **Sideen u sheegan karaa kiridhitkan?**

Sannadaha cashuurta 2022 iyo ka hor, codso Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska adoo isticmaalaya Jadwalka M1WFC, Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska

Sannadaha cashuurta 2023 iyo wixii ka dambeeyaa, sheeg Kiridhitka Xubin u shaqaynaya Qoyska, Kiridhitka Ilmaha iyo Kiridhitka caruurta waaweyn ee U qalma Jadwalka M1CWFC.

## **Diyaarinta Canshuurta Bilaashka ah**

Waxa kale oo aad u qalmi kartaa diyaarinta cashuur celinta bilaashka ah! [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) gali **free tax preparation** sanduuqa wax laga raadiyo si aad u heshid adeegyada diyaarinta canshuurta bilaashka ah ee kuu dhaw.